

Xiriro iyo kaalmo muhiim ah*

Waxaa kuu yaala kaalmo. Isku duubnaan anakoo dhan waxbaan ka caawin karnaa in la dhabar gooyo Gudniinka Gabdhaha.

West Midlands Police - soo wac 101 ama xaalada dagdagaa wac 999

Crimestoppers - Call 0800 555 111 to report any information anonymously

NSPCC FGM Free 24hour Helpline - Hadii aad u baahantayah kaalmo ama aad rabto in aad ka hadasho walaacaaga 0800 028 3550 fgmhelp@nspcc.org.uk

FORWARD UK - www.forwarduk.org.uk

African Well Women's Clinic – Birmingham Heartlands Hospital
07817 534274

Celestine Celest Community Organisation – www.celestinecelest.org 07517 227911

Allies Network – www.allies-network.com 07506 398865

Care for Women and Girls – sdibba@yahoo.com 07799 909523

Birmingham and Solihull Women's Aid – www.bswaid.org
0808 800 0028

Bloomsbury Nursery School & Childrens Centre –
0121 464 2034

Muslim Women's Network – www.mwnuk.co.uk 0121 236 9000

CRASAC (Coventry counselling service) - www.crasac.org.uk
02476 277777

Birmingham Against FGM – www.bafgm.org



Gudniinika Gábahaha



Waa maxay Guđniinka Gabdhaha

FGM (oo sidoo kale loo yaqaan goynta xubinta taranka ama guđniinka gabdhaha) waxay ka goobantahay habraac kasta oo ku lug leh wada bixinta ama dhaawaca qayb ama kuli xubnaha kore ee taran ee dhadhiga sababo aan caafimaad ahayn dartood.

Guđniinka Gabdhaha iyo diinta

- Guđniinka Gabdhaha diin ay qayb ka tahay ma jirto
- Gabdho dhowr diimood kasoo jeeda ayeey saamaysaa maadaamaa ay tani tahay dhaqan bulsho.
- Bibleka ama Quranka midkoodna dhihi mahayo waa in gabdhaha la gudaa
- Dadka qaarkood aaya aaminsan in ay qayb ka tahay diin laakiin tani waa been
- Guđniinka gabdhaha wuxuu ka dhex dhacaa bulshooyin aduunka daafihilis, oo ay ka mid tahay UK.

Dhibaatooyinka caafimaadka ee Guđniinka Gabdhaha

- Xanuun iyo argagax aad u badan
- Infekshano kaadida oo soo noqnoqda iyo dhibaato kaadinta
- Dhibaato dhiiga caadada iyo dhalmo la`aan
- Dhibaatooyin nafsi
- Dhibaatooyin xiriirada galmada
- Dhibaatooyin fool, oo nolosha hooyada iyo dhalaanka halis galinaya



Gudniinka Gabdhaha iyo Sharciga

Nuucyada dhan ee gudniinka gabdhaha UK sharci darro ayeey ka ahaayeen ilaa 1985.

Sharciga Gudniinka Gabdhaha ee 2003 (The Female Genital Mutilation Act 2003) wuxuu ka dhigaya:

- Sharci darro in UK lagu sameeyo Gudniinka gabdhaha
- Sharci darro in gabar lagu caawiyo in ay naafayso xubnaheeda taranka
- Sharci darro in gabdho wadanka dibadiisa loo geeyo si loosoo gudo ha ka ahaato mid sharci ama sharci darro ahba wadankaas
- Sharci darro in la qorsheeyo, la kaalmeeyo, ama la qariyo kuwo kore midkasta oo ka mid ah

Dambi sharcigaan hoos taga wuxuu leeyahay ciqaab ugu badnaan ilaa 14 sano oo xabsi ah iyo/ama ganaax

Gudaha Qaybta 72 ee Sharciga Dambiyada Halistaa 2015 (The Serious Crime Act 2015) hada waa dambi in laga hortagi waayo in gabar la gudo.

Tan macnaheedu waa in hadii ficol gudniin ah loo gaysto gabar ka yar 16 jir, qof kasta oo masuul ka ah gabadhaas markii gudniinku dhacay wuxuu mudnaanayaa in dambi maxkamad kusoo oogto.

Ciqaabtu waa ilaa 7 sano oo xabsi ah.

Dhibanaayasha dhan ee gudniinka gabdhaha hada waxay xaq u leeyihiin in aan waligood la ogaan, taasoo macnaheedu yahay in saxaafadu aysan daabici karin wax magacyaa ama fahfaahinaa oo lagu aqoonsan karo dhibnaha.

Wax farqi ah um dhaxeeyo hadii gabadhu ama dumarku ay ogolaatay in la gudo- sharciga ayeey lidi ku tahay.

